



## Sideen ku hubin karaa in dhinacayga sheekada la maqlo?

- La shaqee oo sii shaqalaha kiiska magacyada iyo macluumaadka xiriirka dadka ku siin kara macluumaad dheeraad ah. Ogolaanshaha qoran ayaa laga yaabaa in loo baahdo xaaladaha qaarkood.
- U oggolow shaqalaha kiiska gurigaaga si ay si fiican ugu fahmaan xaaladdaada.
- Ka qaybgal dhammaan shirarka loo dejiyay in lagaga hadlo kiiska ama carruurtaada.
- Weydii su'aalo ku saabsan habka iyo waxaad samayn karto.
- Hubi inaad u kaxayso carruurtaada balamo kasta ama khabiirada marka la codsado.
- Hubi in shaqalaha kiiska loo cusboonaysiiyay isbedel kasta sida ciwaan cusub, qof cusub oo guriga ku nool, ama macluumaadka xidhiidhka cusub.
- Weydii kheyraadka. Degmooyinka qaar, u doodeyaal waalid ayaa diyaar u ah inay ku taageeraan muddada baaritaanka.
- U oggolow shaqalaha kiisku inuu ogaado dadka kale ee aqoonta u leh xaaladda. Markasta oo xog badan uu haysto hawlweedenka kiiska ayaa sida ugu wanagsan ay go'aan uga gaari karaan.



## Yaan la xiriiraa haddii aan welwel ka qabo kiiskeyga?

Haddii aad qabto cabasho ama walaac, fadlan la xidhiidh shaqaalaha kiiskaaga ama kormeerahooda.

Haddii welwelkaaga aan weli la xalin, waxaad wici kartaa maamulaha agagaarkaaga.

Waxaad ka wici kartaa Office of Constituent Relations (Xafiiska Xidhiidhka Dadweynaha) at 1-800-723-4831 caawinaad wakhti kasta -ama- Waxaad wici kartaa Office of the Family & Children's Ombuds (Xafiiska Qareenka Qoyska & Carruurta)\* lambarkan 1-800-571-7321.

*\*Wakaaladani waa ka duwan tahay DCYF. Waxay baartaa welwelka ku saabsan DCYF.*

*Haddii aad jeclaan lahayd nuqulada dukumentigan oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xiriir DCYF Constituent Relations (Xiriirka Deegaanka) (1-800-723-4831 | 360-902-8060, ConstRelations@dcyf.wa.gov).*

## Child Protective Services (CPS) Investigation (Maxaa dhacaya marka ay jirto danbi-baaris la xiriirta adeegyada ilaalinta carruurta)

*Badbaadinta Carruurta inta la xoojinayo Qoysaska*



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**





## Waa maxay Baaritaanka CPS?

Baaritaanka CPS waa jawaab celinta eedeeynta ah in cunug uu soo gaaray xadgudub ama dayacaad. Waa isku day tifaftiran oo cadaalad ah in lagu barto xaqiiqooyinka ku xeeran in xadgudubka, dayaca, ama katagidda ubadku ay dhaceen, sida ama haddii ay tani khatar gelinayso carruurta mustaqbalka xadgudub ama dayac, iyo haddii carruurta ay badbaado yihiin. Tan waxaa lagu dhammaystiray weydiimo iyo waraysiyo lagu helay ilo kala duwan oo khuseeya.

## Waa maxay sababta la ii baarayo?

- The Department of Children, Youth and Families (Waxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska, DCYF) waxay heshay warbixin walaac ku saabsan badbaadada carruurtaada.
- Warbixintu waxay buuxisay qeexida sharciga ah ee xadgudubka iyo dayaca carruurta (RCW 26.44.020).
- Warbixintu waxay muujisay eedeymaha inay yihiin kuwo dhexdhexaad ah ama khatar sare leh ama laga yaabo inay jirto khatar degdeg ah oo ku wajahan ilmahaaga.
- DCYF waxay doonaysaa inay kula shaqeyso si ay carruurtaada u ilaaliso badbaadada.

## Waa maxay qeexida xadgudubka iyo dayaca ilmaha?

Xadgudubka ama dayaca ilmaha micnaheedu waa dhaawaca, xadgudubka galmo, ama dhiig-miirashada galmo ee qof kasta oo ubadka u geysto shuruudo muujinaya in caafimaadka, daryeelka, ama badbaadada ilmaha ay waxyeelo soo gaadhay, ama daawaynta dayacan ama si xun ula dhaqma ilmaha. Ka eeg cutubka 110-30 WAC faahfaahin dheeraad ah oo laga heli karo onlayn

<https://apps.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-30&full=true>.

## Maxaa laga filayaa Baaritaanka?

- DCYF waxay si weyn u qiimeysaa unugga qoyska waxayna ka shaqeysaa inay carruurta ku hayso guryahooda haddii ay si ammaan ah halkaas ugu joogi karaan. Badbaadada ubadkaagu waa muhiimada ugu saraysa, shaqalaha kiiskuna si dhow ayuu kula shaqayn doonaa si uu u helo hab aad ilmahaaga ugu ilaalin karto gurigaaga, haddii ay suurto gal tahay.
- Adiga iyo carruurtaada waa in loola dhaqmo si xaq ah oo ixtiraam leh mar kasta.
- Waalid ahaan, masuulka sharciga ah, ama mawduuca waxa lagu waraysan doonaa iyada oo qayb ka ah baaritaanka.
- Sharci ahaan, carruurta waa la waraysan karaa sawirrona waa laga qaadi karaa, iyadoo qayb ka ah baaritaanka, fasax la'aan. Carruurta waxay xaq u leeyihiin inay joogaan cid saddexaad oo ay doortaan inta lagu jiro waraysiga.
- Macluumaadka waxaa lagu soo ururin doonaa iyada oo la helayo diiwaanno iyo wareysiyo lala yeesho xiriirro muhiim ah oo kala duwan.
- Marka ay jirto qayb danbiyeedka eedaymaha, baaraha CPS waxa laga yaabaa in ay ku kooxeeyaan sharci fulinta si loo dhimo cadaadka macluumaadka soo noqnoqda ee la ururiyay.
- Adeegyada waxaa laga yaabaa in lagu bixiyo si wax looga qabto baahiyaha qoyskaaga, loo yareeyo khatarta iyo welwelka badbaadada, ama kiiskaaga waxaa loo wareejin karaa Family Voluntary Services (Adeegyada Mutadawacnimada Qoyska, FVS) si loola socdo.

## Waa maxay jawaabta?

Eedeymaha waxay noqon karaan "La aasaasay" ama "aan sal lahayn". Natiijooyinka la aasaasay waxay ka dhigan tahay, iyadoo lagu salaynayo macluumaadka la hayo, ay aad ugu dhowdahay in xadgudub ama dayacaad ubadku dhacdo. Aasaaska la'aanta macnaheedu waa, iyadoo lagu salaynayo xogta la hayo, waxay aad ugu dhowdahay in xadgudubka ama dayaca ilmaha aysan dhicin ama cadaymo ku filan oo lagu go'aamiyo in eedeymaha ay sameeyeen ama aysan dhicin aan la heli karin.

## Sidee baa la ii ogaysiinayaa helidda?

Warqad ayaa lagu soo diri doonaa oo lagugu wargelinayaa natiijada. Haddii natiijada la asaasay, warqaddu waxay kuu sheegaysaa sida aad racfaan uga qaadan lahayd natiijada. Racfaankan waa inuu ku gaaraa xafiiska DCYF 30 maalmood gudahooda laga bilaabo maalinta la helo warqadda natiijada ama natiijadu waxay noqon doontaa kama dambays. Hubi in haddii aad guurto shaqaalaha kiisku uu ka warqabo cinwaankaaga cusub.

## Sidee baa helitaan la aasaasay ii saameyn karaa?

Natiijooyinka la aasaasay waxaa lagu kaydiyaa si qarsoodi ah nidaamka kombiyuutarka ee DCYF. Waxaa loo isticmaali karaa ujeedooyinka soo socda:

- Caddeynta ficillada maxkamadda ee khuseeya carruurtaada.
- Go'aminta haddii aad shaqayn karto, shati haysato, ama iskaa wax u qabso si aad u daryeesho carruurta iyo dadka waaweyn ee nugul.
- Macluumaadka asalka ah, haddii ay dhacdo eedeymaha mustaqbalka.
- Go'aminta haddii aad u qalanto meelaynta qaraabada ama xigtada ee soo gala daryeelka.

